

Dadka lagu guubaabiyey iney guriga joogaan 14 maalmood

Maadaama aad joogtay agagaarka dhismeyaasha dugsiya sare ee Broman inta u dhexeysay 9-12 bisha maarso ayaa waxaa laga yaabaa inaad qaaday caabuqa corona ee sababa cudurka Covid-19. Waxaana taa ugu wacan in uu iskuulka joogay xilliga u dhexeysay 9-12 bisha maarso qof markii dambe ku caddaatay inuu qabo caabuqa corona.

Ayadoo lagu guubaabinayo dhammaan dadka joogay dugsiya sare ee Broman xilligaa iney guryahooda ku hakadaan ayaa waxaan yarayn karnaa inuu cudurka ku faafdo dadweynaha degmada Hudiksvall. Taasoo mecaheedu tahay inaad guriga joogeysa ilaa iyo markay taariikhdu tahay 30ka bisha maarso.

Qofka qaaday caabuqa cudurka ayaa waxay ku qaadanaysa 2-14 maalmood laga bilaabo maalinta la qaadiyey cudurka ilaa iyo qofku ka xanuusanayo. Badanaa waxay jirradu dhacdaa 5 ama 6 maalmood qaadiinta ka dib. Haddii aad la xanuunsato qufac, xummad, jidhka oo ku xanuuna iyo daal waxaa arrimahaa sababi kara caabuqa corona. Waa marka uu qofku xanuunsado marka uu qaadiin karo cudurka dadka kale.

Maadaama dad badan lagu qaadiin karo cudurka marka iskuulka la joogo, haddana uu cudurku uu kuugu bilaabanayo asagoo soo xaluulanayo uuna wato keliya xanuun yar welina uu yahay mid la isqaadiin karo ayaa waxaan kuugu guubaabinayaa inaad guriga joogto oo aadan bixin inta lagu jiro dhammaan 14ka maalmood.

Taasoo mecaheedu tahay in aadan u dhawaaneyn meel u jirta 2 mitir dadka kale aan ka ahayn dadka aad la nooshahay, guriga ayaadna joogeysaa.

Waxaad si gaar ah uga dheeraanaysaa ugu horeyn dhammaan la xiriirka dadka waayeelada, haddii ay wax cudur ah qabaan. Dadka da'da yar ee ku xanuunsada cudurka caabuqa corona waxay u bukoodaan ku dhawaad si la mid ah sida marka uu ku dhaco hargab ama duray keligii buuna iska baxaa cudurka.

Marka qofku yahay hawlgabe da'weyn markaa waxaa jirta khatar in duraygu u gudbo xaalado adag ee cudurka sambabada ee u baahan daryeel cusbitaal. Arrintaasi waxay khusaysaa gaar ahaan waayeelada qaba cudur dabadheer sida cudurada wadnaha iyo sambabada.

Haddii uu ku qabsado xanuunka dhuumaha neefsashada ee aad u adag 14 maalmood gudahood adigoo guriga jooga aadna si xun u xanuunsato waxaad la xiriireysaa cusbitaalka daryeelka adigoo wacaya lambarka 1177. Waxay noqon kartaa haddii aadan awoodin inaad joogsato, wax cunto, wax cabto ama neefsashada dhib kuugu noqoto.

Haddii aad keliya wax yar uun xanuunsato markaa waa inaad keliya sugtaa inta aad haddana ka roonaaneyso. Haddii xanuun yar keliya ku hayo markaa waad kici kartaa, wax cuni kartaa, wax cabi kartaa oo waad iska roon tahay.

Marka aad xanuunsato waxaad guriga jooqeysaa dhammaan xilliga aad xanuunsan tahay iyo laba maalmood dheeraad ah marka aad bogsooto. Dadkoo dhammi waa iney guriga joogaan ugu yaraan 14maalmood laakiinse dabcan qofka xanuunsaday waxuu u baahan karaa in intaa ka badan.

Dadka aad la deggan tahay ayagana waxaa laga yaabaa iney xanuunsadaan markaa ayagana waa iney guriga joogaan. Haddii qofku uu si xun u xanuunsado markaa waa inuu la xiriiraa cusbitaalka daryeelka caafimaadka asagoo wacaya lambarka 1177.

Haddii aad la deggan tahay qof aan ku sugneyn dugsiiga sare ee Broman xilliyada 9-12 ee bisha maarso markaa qofkaa laguma xisaabinayo qof cudurka gudbin karna haddii uu caafimaad qabo. Wuxuu qofku keliya cudurka dadka kale qaadiin karaa haddii uu qofku qabo calaamadaha xanuunka neefmareenka ama neefsashada ee lagu yaqaan xummad iyo/ama duray/qufac ee badanaaba uu wehliyo kor xanuun/ xanuunka jidhka iyo daal.

Signar Mäkitalo
Dhakhtarka cudurrada faafa (Smittskyddsläkare)

Gobolka Gävleborg

Iskuulka waa inuu siiyaa habka lala xiriirayo cusbitaalka